

Hel caymiska caafimaadka ee aad u baahan tahay si aad u caafimaadqabto

Washington Healthplanfinder™ waa goobta suuqa barta internet-ka ee gobolka halkaasi oo ay reer Washington ka iibsan karaan, isku barbardhigi karaan oo ayna isaga diiwaangelin karaan caymiska caafimaadka iyo ilkaha oo tayo leh. Iyada oo lagu saleynayo dakhliga iyo inta uu le'eg yahay reerkaaga, ayaa waxaad xaq u yeellan kartaa kaydada federaalka iyo/ama gobolka ee hoos u dhigi kara kharashkaaga bilaha ee caymiska. Waxaad sidoo kale xaq u yeellan kartaa oo aad isku diiwaangelin kartaa Washington Apple Health (Medicaid).

Waxaad isku diiwaangelin kartaa caymiska caafimaadka iyo ilkaha inta lagu guda jiro isqoritaanka furan (laga bilaabo 1-da Nof.) ama 60 maalmood gudahooda ka-dib dhacdada nololeed ee u qalanta. Dhacdooyinka nololeed ee u-qalma waxaa ka mid ah luminta caymiska cidda loo shaqeyo, isbeddelka dakhliga ama inta uu reerka le'eg yahay iyo in kale oo dheeraad ah. Apple Health waxaa la heli karaa sannadka oo dhan.

Washington Healthplanfinder, waxaad ka heli doontaa:

- ✓ Kaydad gaar ah oo kaa caawinaya hoos u dhiga kharashkaaga billaha ee caymiskaaga.
- ✓ Qorsheyaal tayo leh oo caymiya 10 dheefaha caafimaadka aasaasiga ah sida daryeelka ka hortagga, adeegyada caafimaadka dhimirka, daryeelka dhalmada ka hor iyo kuwo kale oo dheeraad ah.
- ✓ Caawimaadda isdiiwaangelinta gobolka oo dhan oo lacag la'aan ah.

Caawimaad ma u baahan tahay?

Shabakadeenna caawiyaha gobolka oo dhan ayaa kaa caawin karta iibsashada qorshayaal, fahamka caawimaad maaliyadeed iyo in aad isdiiwaangeliso. Booqo wahealthplanfinder.org si aad kheyraad lagu kalsoon yahay uga raadiso degaankaaga.

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Xarunteenna Taageerada Macmiilka lambarkan 1-855-923-4633. Caawimaad luuqadeed ayaad ku heli kartaa in ka badan 200 luuqadood oo kala duwan.

Sida la isugu qoro

Booqo www.wahealthplanfinder.org ama iskaan-garee koodhka QR si aad isku diiwaangeliso.

